

AFTER - Against FGM/C Through Empowerment and Rejection Project  
 JUST/2014/RDAP/AG/HAFM/8001  
 This Factsheet has been produced with the financial support of the Rights, Equality and Citizenship Programme of the European Union. The contents of this Factsheet are the sole responsibility of ActionAid International Italia Onlus and the project partners and can in no way be taken to reflect the views of the European Commission.

## CAAFIMAADKA DUMARKA

Nadaamka Daryeelka Caafimaad ee Qaranka Sweden wuxuu xaqiijiyay xaqiijiyay in loo simaado daryeelka caafimaadka iyo daaweynta dhammaan dadka ku nool Sweden iyadoo aan loo eegayn jinsiigooda. Dhalmada iyo daryeelka caafimaadka caruurta waa bilaash Sweden oo dhan waana marka lagu daro qaxootiga iyo dadkaaan haysan waraabo. Dumarku way iska xadiriin karaan xarun kasta oo dhalmo markay doonaan iyakoon ballan samaysan. Xarumahan waxay bixiyaan adeegyo bilaash ah sida baadhis in uur jiro, daryeelka caafimaad intay haweenaydu uurka leedahay, markay dhalayso, latalinta qorshaynta qoyska iyo latalinta iyo baadhista xannunada galmada laysku qaadsiiyo. Sidaasoo ay tahay, hawlo daryeel dhalmo oo u baahan takhsus, caafimaadka dumarka iyo ilmaha oo layska soo ridaa waxay u baahanaysaa in la bixiyo lacagtii wadaagga kharajka.

Dumarka qaxootiga ah iyo muhaajiriinta aan ku hadlin afka Swedishka waxay xaq u leeyihiin inay sii codsadaan in xarunta caafimaad hore ugu sii ballamiso turjubaan markay la kulmayaan qof caafimaadka ka shaqeeya. Bukaanku wuxuu kala dooran karaa in turjubaan ku la fadhiiyo ama in meel dheer looga turjumo, iyo weliba inuu doorto jinsiga uu rabo in turjubaan ku noqdo. Dhammaan turjubaanada iyo shaqalaha caafimaadku waxay ilaaliyaan wixii xog ah ee gaar ah inaysan cid la wadaagin.

## CAAFIMAADKU WAA XAQ AAD LEEDAHAY

Daryeelka Caafimaadka Qaranka ee Sweden waa mid u furan dadka oo dhan marka lagu daro ajaa'ibta hadii ay haysaan lambarka aqoonsiga qof ahaaneed ayna deggan yihiin Sweden. Nadaamka Daryeelka dadka ayaa kharajka caafimaad inta badan bixiya. Daryeelka caafimaadka dhalmada iyo caruurta waa bilaash, halka adeegyada kale u baahan yihiin lacag uu bixiyo qofka xannunaysaa (wadaagista kharajka baxaya).

### Daryeelka Caafimaad ee Gaarka loo Leeyahay iyo Kan Dadweynaha

Daryeelka Caafimaad ee Sweden wuxuu isgu jiraa mid guud iyo mid gaar loo leeyahay; kan guud waxaa maamulaha maamulada gobolada halka kan gaarka ah kontoraad loogu dhiiday maamulada gobolada. Bukaanku waxaa u furan inay adeegga caafimaad ee aasaasiga ah ka doortaan xarumaha caafimaad kharajka ah. Bukaanka doorta adeeg caafimaad oo gaar loo leeyahay waxaa ilaalinaya sharciyada lagu ilaaliyo adeegyada caafimaad ee guud.

### Wadaagista Kharajka Baxaya

Sweden waxay leedahay hab kharajka lagu wadaago; bukaanka waxaa la weydiiyay in yar oo ka mid ah kharajka baxaya markay tagaan xarun caafimaad. Siyaasadda ilaalisnaa kharajku badan ayaa xad u yeesha inta ugu badan qof bixin karo markuu tago xarun caafimaad. Hadii kharajka bukaan ku gaaro SEK 900 ilaa 1,100 wixii dambe ee daryeel caafimaad ah ee uu u baahdo sanadka inta hartay waxay noqonaysaa bilaash. Waa sidan intaa dadka laga qaado badanaa maamulada gobolada iyo degmooyinka

1. Ballan dhakhtar xarunta caafimaad waxay noqonaysaa SEK100 – 300
2. Ballan lagu arko dhakhtar takhsus leh waa inta u dhaxaysa SEK150 -350
3. Booqasho lagu tago qof daryeel caafimaad degdeg ah waa inta u dhaxaysa SEK220-400
4. Ballan lagu arkayo neeras ama physiotherapy waa SEK50 – 220.
5. Baadhis caafimaad dumarka, eegista kansarka naaska ama dheecaan laga qaado makaanka waxay noqotaa ilaa SEK200.

Hadii bukaan ku uusan soo sheegin inuusan ballan ama uba iska maqnaado welli lacagtii inuu bixiyo waa laga rabaa.

Dadka aan degganayn Sweden ee ka yimaada EU ama EEA waxay xaq u leeyihiin daryeel iyo adeeg caafimaad oo la mid ah dadka deggan Sweden xagga lacagta ay bixiayaan hadii ay caddeeyaan inay haysaan Kaadhka Caafimaad ee Yurub. Dadka aan degganayn EU ee soo booqda Sweden muddo kooban waxaa looga baahan yahay inay haysaan kaadh caymis caafimaad oo gaar ah si loogu dallaco kharajkooda caafimaad intay joogaan Sweden. Qaxooti aan haysan waraabo iyo caruurta da'doodu ka yar tahay 18 waxay xaq u leeyihiin daryeel iyo adeeg caafimaad oo la mid ah caruurta deggan Sweden oo dhan. Dadka waawayn iyo qaxootiga aan waraabo haysan waxay xaq u leeyihiin daryeelka adeeg caafimaad(tusaale: daryeelka dhalmada).

## Adeegyada aad Sweden ka heli kartid

### Tusaha Daryeelka Caafimaad ee Gobolada iyo Deegaanada 1177

Tusahan waxaad ka helaysaa warar, dhiirrigelin iyo adeegyo internetka ah oo daryeel caafimaad ah. 1177 waa lambar ay ku midoobeen oo loo sameeyey dadweynaha ayaa sameeyeen gobolada iyo deegaanada Sweden oo dhan. Tusahani wuxuu ku siinayaa latalin daryeel caafimaad oo dhanka telefoonka iyo internetka ah. Tusuhu wuxuu bukaanka ka caawiyaa inay la xiriiraan adeegyada caafimaad, dalbadaan, kansalaan, ama bedelaan ballamaha.

**Kala xiriiir:** T: 1177 W: 1177.se

### Degaanka Östergötland waxay kasoo horjeeda dhibka qof loogu geysto sharaf ilaalin darteed iyo gudniinka fircooniga ah ee dumarka (FGM)

Guddiga Maamulka Deegaanka Östergötland waxay dawladda uga wakiil yihiin in laga soo horjeesto dhibka qof loogu geysto sharaf ilaalin darteed iyo dulmiga iyo siyaalaha badan ee loo fuliyo sida ilma yar oo loo guuriyo, guur laysku khasbo, iyo gudniinka fircooniga ah ee hablaha iyo dumarka (FGM).

Mashruuca Hedersförtryck waa degel wararka uu ka dheegan karo qof waliba oo soo arkay wax dhib ah oo la xiriira ilaalin sharafeed iyo dulmi una baahan caawin. Degelku wuxuu taxayaa dhammaan adeegyada ay u baahan karaan dumarka soo arkay dhib kasta oo loo geystay marka lagu daro (FGM).

**Kala xiriiir:** T: 010-223 50 00 W: hedersförtryck.se

### Guddiga Qaranka ee Caafimaadka iyo Daryeelka – Socialstyrelsen

Tani waa hay'ad dawladeed oo hoos tagta Wasaaradda Caafimaadka iyo Arrimaha Bulshada, qabatana hawlo aad u baaxad weyn iyo waajibbaad badan oo ku taxaluqa adeegyada bulshada, adeegyada caafimaadka iyo daaweynta, amniga bukaanka iyo ilaalinta iyo lasocodka cudurada.

**Kala xiriiir:** T: 075 247 30 00 W: socialstyrelsen .se




Photo: Jennifer Huxia/Actionaid | Ewanine, 25, East Pokot, Kenya, pictured with her daughter Mercy

AFTER is a Project co-funded by the Rights, Equality and Citizenship (REC) Programme of the European Union. For more information, please visit our website: [afterwomen.eu](http://afterwomen.eu) or contact us: [EUProjects.ita@actionaid.org](mailto:EUProjects.ita@actionaid.org).

**CAAFIMAADKAAGA, XUQUUQDAADA**  
**Adeegyada Caafimaadka ee hab-taranka**  
**Iyo galmoodka ee Dumarka Qaxootiga ku Jooga sweden**



Photo: Vaid Sakhin/ActionAid



Photo: Amrizzaman/ActionAid



Photo: Jake Lyell/Shoot the Earth/ActionAid



Photo: Lianna Milton/Paros/ActionAid

# CAAFIMAADKAAGA, XUQUUQDAADA

AFTER - Against FGM/C Through Empowerment and Rejection Project